HIV, warbixinta bukaanka 2004-07-01.

Warbixinta bukaanka iyo asluubta hab-dhaqanka. Warqadda warbixinta ee takhtarka badbaadinta cudurrada lays qaadsiyo.

Halista faafinta

Waxaad qabtaa infeekshanka HIV. Siyaabaha laysu qaadsiiyo HIV waxaa kamid ah, dhiigga, markii laysu tago ama hooyada AY dhallankeeda u gudbisa markii ay uurka leedahay ama ummulbaxayso. Siyaabaha dhiigga laysugu qaadsiiyo waxaa kamid ah: dhiig-shub, ku mudo qof bukan ama qof bukan irbad loola qaybsado. Halista faafinta waxay kaloo jirtaa haddii dhiig infeekshanka leh u taabto axal-dhaxaleedka. Cudurkeenaha HIV laysma qaadsiiyo markii xiriir caadi ah la yeelanaayo. Infeekshanka HIV lagama boogsado. Qofka qaba HIV wuxuu jirkiisa ku sida cudurkeenaha ilaa inta noloshiisa ka hartay. Halista cudur faafinta way jirta xitaa haddii bukaanka cudurka laga daaweeyo.

Astamaha cudurka

Tiro ka badan boqolkiiba qonton waxay astamaha HIV dareemaan durbadiiba, 1-4 toddobaad kadib markii cudurkeenaha la qaadsiiyay. Astammaha waxay noqon karaan qandho, firiiricyo, dhuunxannuun, qanjir-barrar iyo madaxxannuun, kuwaaso bukaanku dareemo 1-2 toddobaad kadib. Markii dhowr sano kadib difaaca jirka uu hoos u dhaco, waxaa soo shaac baxo astammo kale, xilli kadib waxaa soo shaacbaxa jirrooyinka infeekshana kala duwan, taaso ah cudurka AIDS. Daawaynta HIV waxay hakisaa dhibaatadaas.

Carruurta qaba HIV

Carruurta yaryar u ma adkeeysan karaan infeekshanada, sidaas awgeed kuwa jirran lagu ma xannaanyn karo goobaha caadi ahaan carruurta lagu xannaaneeyo. Takhtarka cunugga ayaa xilhaayeha cunuga siin doono warbixin ku saabsan carruurta qaba HIV. Warbixinta HIV waxaa la bixiya kadib markii oggolaansho laga helo xilhaayeha cunugga.

Dhaqdhaqaaqa xirfada

Caadi ahaan bukaanku wuu shaqaysan karaa. Haseyeeshe takhtarkiisa ayaa arrintaas qiimeeyo oo go'aamiyo kadib markii takhtarku u la tashado takhtarka badbaadinta cudurrada lays qaadsiyo waa haddii arrinta ay ku saabsan tahay qof takhtar ah, takhtarka caafimaadka ilkaha ama shaqaalaha daryeeka caafimaadka. Kuwaaso shaqadooda awgood xiriir dhiig yeelan karo. Waxaa la siiyaa warbixinta asluubta hab-dhaqanka ku saabsan hawlaha ay qabtaan.

Galka guuska wuxuu lee yahay badbaadin wanaagsan

Galka guuska wuxuu lee yahay badbaadin wanaagsan, oo looga badbaado HIV iyo cudurrada kale ee laysku qaadsiyo galmada, waa haddii galka a adeegsado kolkii la galmoonaayo.

Talada nadaafadda

Waa in hab taxadarsan faashada loo saara nabarrada – xitaa kuwa yaryar. Haddii qof u ku caawinaayo, waa in qofkaasi u gashada galka gacmaha la gashato. Hab wanaagsan oo taxadarsan u baakadeey waxyaalaha wasakhda ahi ee dhiiga leh intii aadan qashinka ku tuurin. Dhiigga gaara, tusaale sida dhulka waa in lagu tirtiraa daawada klorin/virkon ama daawo lamid ah.

Smittskyddsläkaren i Dalarnas län
023-49 23 26

Asluubta hab-dhaqanka

• Waa inaad timaada markii baaritaan iyo shaybarro awgood lagugu yeero, kuwaaso takhtarka ku wargeliyay in ay muhi yihiin.
• Markii aad booqaneeyso rugta dareyeelka caafimaadka ama rugta daryeelka caafimaadka ilkaha waa inaad wargelisaa in dhiigaaga u yahay dhiig leh HIV.
• Xilhayeha carruurta waa innuu tixraaca talooyinka degmadiisa laga siiyay ee ku saabsan boos-siinta goobaha carruurta lagu xannaaneeyo ama dugsyada loogu talaggalay carruurta qaba HIV.
• Haddii dhiigaaga u gaaro indhaha, sanka, afka ama haragga qof, waa inaad biyo ku tirtirta kadib markii haragga dhiigga gaaray biyo lagu tirtiray waa in la mariyaa daawada ”klorhexidinsprit”. Qofka dhiigaaga gaaray waa inaad wargelisa halista jirto iyo in dhiigaaga u lee yahay HIV. Waa inad kula talisa in daahid la’aan u la xiriiro rugta daryeelka infeekshanada ”Infektionsmottagning” sida halista loo qiimeeyo, loona siiyo daawada ka hortaga.
• Marna ha ku isticmaalin, yaana lagu isticmaalin qalabka musqusha adiga ku gaarka ah, sida kuwa garka laysaga xiiro ama lagu cadayeesto.
• Haddii aad maandooriye isku durto waa inaad haysataa irbado adiga ku gaar ah, dad kalena waa in ay marna ku isticmaalin. Koobka maandooriyeehe ee wadajirka loogu isticmaalo ha ku isticmaalin. Qalabyada la isku irbadeeyo ee adiga ku gaar ah, waa inaad meel ku keydisaa sidii halista dadka kale looga badbaadiyo.
• Lagu ma oggola masawirada jirka am dhego duleesasho. Sidaaso kale laguma oggola in jirkaaga hawl laga qabto waa haddii mindiyo iwm la adeegsanaayo, halista dhiigbaxana ay jirto, iyadoo sidaasi tahay haddii aad go’aansato inaad falalkas ku dhaqaaqdo waaa inaad qofka hawlaha ku qaban doono wargelisa inaad qabto HIV.
• Waxaad ku qasban tahay inaad galmada horranteeda qofka kale wargelisa inaad qabto HIV. Waa haddii la yeelan doono galmo guska siilka la gelin doono, galmada futada, galmada afka ama siyaabo kale lagu galmoon doono, kuwaaso keeni karo halista faafinta HIV.
• Waa in lagu isticmaala galka guska haddii la yeelan doono galmo guska siilka la gelin doono, galmada futada ama galmada afka.
•Laguma oggola inad bixiso dhiigaaga, shahwadaada, ugxantaada, xubnaha jirkaaga ama nudahaaga.
• Waxaa sii dheeraad ah in sida hadba ku xusan Xeerka Iska Badbaadinta Cudurrada Laysku Faafiyo, cutubka 2 § 2, haweeneyda qabto HIV loo ma oggola in ay naas-nuujiso dhallankeeda.

Cudurka lagu qaadsiiyay waa cudur dadweynaha halis u ah, sida hadba ku xusan Xeerka Iska Badbaadinta Cudurrada Laysku Faafiyo. Sidaas awgeed waxaa waajib kugu ah inaad tixgeliso asluubta hab-dhaqanka takhtarkaaga kula taliyay. Taaso takhtarku dib ugu fiirsan karo haddii aad ka codsato. Sidaas awgeed, waa inaad tixgelisaa asluubta hab-dhaqanka takhtarkaaga kula taliyay.